King County

Macluumaadkaaga. Xuquuqahaaga. Mas'uuliyadaheenna.

OGEYSIISKA HABDHAQANADA ASTURNAANTA
Qaybta Bogsashada iyo Caafimaadka Dabeecadda ee Degmada King

Taariikhda Dhaqangalka: Janaayo 1, 2019

Ogeysiiskan wuxuu sharxayaa sida macluumaadka caafimaadka adiga kugu saabsan loo isticmaalayo loona sheegayo iyo sida aad u heli karitid macluumaadkan. Ogeysiiskan wuxuu sidoo kale sharxayaa sida macluumaadka xanuunka isticmaalka maandooriye ee adiga kugu saabsan loo isticmaalayo loona sheegayo iyo sida aad u heli karitid macluumaadkan. **Fadlan si taxadir leh dib-u eegis ugu samee.**

Qaybta 1aad waxay sharxaysaa xuquuqahaaga; Qaybta 2aad waxay sharxaysaa adeegsiyadeenna iyo sheegista macluumaadka caafimaadka; Qaybta 3aad waxay sharxaysaa adeegsiyadeenna iyo sheegista macluumaadka xanuunka adeegsiga maandooriye; Qaybta 4aad waxay sharxaysaa mas'uuliyadaheenna; Qaybta 5aadna waa macluumaadka dheeraadka ah.

Qaybta 1: Xuquuqahaaga

Marka loo yimaado macluumaadkaaga, waxaad leedahay xuquuqaha qaar. Qaybtan waxay sharxaysaa xuquuqahaaga iyo qaar ka mid ah mas'uuliyadaheenna ee aan kugu caawinayno.

Hel nuqulka macluumaadka caafimaadka

- Waxaad wayddiisan karta in aad aragto ama aad hesho nuqulka macluumaadka caafimaadkaaga ee aanu kaa hayno. Inna wayddii sida tani loo sameeyo.
- Waxaannu bixinaynaa nuqulka ama soo koobidda macluumaadkaaga caafimaadka, sida caadiga ah 30 maalmood gudahooda ee codsigaaga. Waxaanu kugu dalaci karnaa lacag macquul ah, oo qiimo ku saleysan.

Waxaad inna wayddiisaa in aanu saxno macluumaad caafimaad

- Waxaad inna wayddiin kartaa in aanu saxno macluumaadka caafimaadkaaga haddii aad u maleyso in ay qaldan tahay ama in aysan dhammetystirnayn. Inna wayddii sida tani loo sameeyo.
- Waxaanu ku dhihi karnaa "maya" codsigaaga, balse waxaanu kuugu sheegaynaa sababta qoraal 60 maalmood gudahooda.

Codso war-isgaarsiin garsoodi ah

- Waxaan inna wayddiisan kartaa in aan kuula soo xiriirno hab gaar ah (tusaale ahaan, telefoonka guriga ama xafiiska) ama in aan kuugu soo dirno boosto cinwaan kale oo duwan.
- Waxaanu ka fiirsan doonaa dhammaan codsiyada macquulka ah waana in aanu dhahno "haa" haddii aad noo sheegto in aad halis galeyso haddii aanu sidaa sameyn.

Inna wayddii in aanu xaddidno waxa aanu adeegsado ana wadaagno

- Waxaad inna wayddiin kartaa in aanu adeegsan ama wadaagin macluumaadkaaga caafimaadka ee daaweynta, lacag-bixinta, ama hawlgaladeenna. Lanagama doonayo in aanu oggolaanno codsigaaga waxaana dhihi karnaa "maya" haddii ay saameynayso daryeelkaaga.
- Uma wadaagi karno macluumaadkaaga xanuunka adeegsiga maandooriyaha ujeeddooyin daaweyn ama lacag-bixin la'aanta oggolaanshahaaga oo qoran.

Hel liiska kuwa aanu la wadaagnay macluumaad

- Waxaad wayddiisan kartaa liiska (xisaabaadka) ee waqtiyada aanu wadaagnay macluumaadkaaga caafimaadka lix sano kahor taariikhda aad wayddiisanayso, qofka aanu la wadaagayno iyo sababta.
- Waxaanu ku dareynaa dhammaan sheegisyada marka laga reebo kuwa ku saabsan daaweynta, lacag-bixinta iyo hawlgalada daryeelka caafimaadka iyo sheegisyada kale ee qaar (sida mid kasta ee aad na wayddiiso in aanu sameyno). Waxaanu u bixinaysaa hal xisaabin sanadkii oo lacag la'aan ah balse waxaanu kugu soo

dalacaynaa lacag ku saleysan kharashka, oo macquul ah haddii aad wayddiisato mid kale 12 bilood gudahooda.

Hel nuqulka ogeysiiskan asturnaanta

- Waxaad wayddiisan kartaa nuqul waraaq ah oo ogeysiiskan ah waqti kasta, xataa haddii aad oggolaatay in aad ku hesho ogeysiiska elektaroonig ahaan. Waxaan si dhaqso ah ku siinaynaa nuqul waraaq ah.

Xulo qof ku matalaya

- Haddii aad siisay qof awoodda qareenka ee daryeelka caafimaad ama haddii qof uu yahay mas'uulkaaga sharciga ah, qof kaasi wuxuu adeegsan karaa xuquuqahaaga wuxuuna sameyn karaa ikhtiyaarada ku saabsan macluumaadkaaga caafimaadka.
- Waxaanu hubinaysaa qofka in uu helo awooddan iyo in uu ku matalo ka hor inta aan qaadin wax tallaabo ah.

Waxaad gudbisaa cabasho haddii aad dareento in xuquuqahaaga lagu xadgudbay

- Waad caban kartaa haddii aad dareento in aan ku xadgudubnay xuquuqahaaga adiga oo nala soo xiriiraya adiga oo adeegsanaya macluumaadka ku qoran bogga 3aad.
- Waxaad ka xareyn kartaa cabasho Sarkaalka Astrunaanta Waaxda Bulshada iyo Adeegyada Aadanaha ee Degmada King adiga oo waraaq u soo diraya 401 Fifth Avenue, Suite 400, Seattle, WA 98104 ama Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareynakna 200 Independence Avenue S.W., Washington, D.C. 20201, wacaya 1-877-696-6775 ama booqanaya www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints/.
- Kaagama aargoosanayno adiga soo gudbinta aad soo gudbisay cabashada.

Qaybta 2: Isticmaalkeenna iyo Sheegisyada Macluumaadka Caafimaad

Waa sidee sida caadiga ah ee aanu u adeegsanno ama u wadaagno macluumaadkaaga caafimaad?

Caawimo ka geyso maareynta daaweynta daryeelka caafimaad ee aad hesho

- Waxaanu adeegsan karnaa macluumaadkaaga caafimaad waxaanu la wadaagi doonaa xirfadleyaasha ee ku daaweynaya, ee isku dubaridaya daryeelkaaga ama kugu caawinaya meelaynta guryeynta (haddii aadan haysan guryeyn).
  Tusaale: Bixiye ayaa inoo soo diraya macluumaad ku saabsan adeegyadaada daaweynya sidaa awgeed waxaanu qabanqaabin karnaa caynsanaan ama in aan isku dubaridno adeegyo dheeraad ah.

Socodsiinta hawlaha ururkayaga

- Waxaan u adeegsan kartaa oo aan u sheegi karnaa macluumaadkaaga si aanu u socodsiino hawlaha ururkeenna iyo in aan kula soo xiriirno marka loo baahan yahay.
  Tusaale: Waxaanu u adeegsanaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan in aanu sameyno adeegyo wanaagsan oo adiga laguugu talogalay.

Bixinta lacagta adeegyada caafimaadkaaga

- Waxaan isticmaali karnaa oo aan sheegi karnaa macluumaadka caafimaadkaaga inta aanu bixinayno adeegyadaada caafimaad.
  Tusaale: Waxaanu la wadaagaynaa macluumaadka adiga kugu saabsan Maamulka Daryeelka ee Waaxada Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington oo loogu talogalay lacag-bixinta adeegyada aad qaadato.

Waa sidee sida kale ee aanu u adeegsanno ama u wadaagno macluumaadkaaga caafimaadka? Waxaa la noo oggol yahay ama la naga doonayaa in aanu u wadaagno macluumaadkaaga siyaabo kale. Sida caadiga ah siyaabo ka qaybqaadanaya wanaagga dadweynaha, sida caafimaadka dadweynaha iyo cilmi-baarista. Waa in aan ka soo baxno shuruudo badan oo sharci ah ka hor inta aan u wadaagin macluumaadkaaga

ujeeddooyinkan. Wixii warbixin dheeri ah ka eeg:
www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/index.html**.**

Gacan ka geysashada arrimaha ammaanka iyo caafimaadka dadweynaha

Waxaan u wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan xaaladaha qaar sida:

- Ka hortagga cudur.
- Ka-warbixinta ficil-celinada xun ee daawooyinka.
- Ka-warbixinta xadgudub laga shakiyey, dayacaad, ama tacadiyad guri.
- Ka hortagidda ama yareynta halista dhabta ah eek u wajahan caafimaadka ama ammaanka qof.

Sameynta cilmi-baaris

Waxaan u adeegsan kartaa ama u wadaagi karnaa macluumaadkaaga cilmi-baaris caafimaad.

U hoggaansanka sharciga

Waxaanu wadaagi doonaa macluumaadka adiga kugu saabsan haddii sharciyada dowladda ama federaalka ay u baahan yihiin, oo ay ka mid tahay Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha haddii ay doonayso in ay aragto in aanu u hoggaansamayno sharciga asturnaanta federaalka.

Ka jawaabno codsiyada tabarruca unugga/xubnaha iyo nudaha iyo in aanu la shaqeyno bare caafimaad ama agaasime duug

- Waxaanu la wadaagi karnaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan ururrada soo ibinta xubnaha/unugga.
- Waxaanu la wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka sarkaalka baara dhimashada laga shakiyo, baaraha caafimaad, ama agaasimaha duugta marka uu qof dhinto.

Ka jawaabno magdhowga shaqaalaha, sharci-fulinta, iyo codsiyada kale ee dowladda

Waxaanu u adeegsan kartaa ama u wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan:

- Xagsheegashooyinka magdhowga shaqaalaha.
- Ujeeddooyinka sharci fulin ama sarkaal sharci fulin.
- Hay'adaha kormeerka caafimaadka ee hawlaha uu oggolaaday sharciga.
- Shaqooyinka dowladda ee gaarka ah sida militariga, ammaanka qaranka, Iyo adeegyada difaaca madaxtooyada.

Ka jawaabidda dacwadaha iyo tallaabooyinka sharciga

Waxaanu wadaagi karnaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan anagga oo ka jawaabayna amar maamul ama maxkamadeed, ama anaga oo ka jawaabayna codsi maxkamadeed.

Isticmaalada iyo Sheegitaanada Kale

Sheegitaanada loogu talogalay qoraalada daaweynta cudurka nafsaaniga, sheegitaanka loogu talogalay ujeeddooyinka suuqgeynta iyo sheegitaanka ka kooban iibinta macluumaadka caafimaadka ee dhawran waxay u baahan yihiin oggolaanshahaaga. Isticmaalada iyo sheegitaanada kale ee aan lagu qeexin Ogeysiiskan waxaa la sameynayaa kaliya iyada oo la adeegsanayo oggolaanshahaaga oo qoran.

Qaybta 3: Isticmaaladeenna iyo Sheegitaannada Macluumaadka Xanuunka Isticmaalka Maandooriyaha

Qarsoonaanta macluumaadka xanuunka xadgudubka maandooriyaha waxaa dhawra xeerhoosaadyada ee ka adag xeerhoosaadyada ee loogu talogalay macluumaadka caafimaadka guud. Tusaale ahaan, uma wadaagi karno macluumaadkaaga xanuunka adeegsiga maandooriyaha ujeeddooyin daaweyn ama lacag-bixin la'aanta oggolaanshahaaga oo qoran.

Waxaa uu noo oggol yahay ama naga doonayaa sharciga federaalka in aanu u wadaagno macluumaadkaaga xanuunka isticmaalka maandooriye la'aanta oggolaanshahaaga qoran siyaabahan soo socda.

- Hawlwadeennaka caafimaadka ee xaaladaha degdega ah ee caafimaadka.

- Maamulada habboon si loo sheego xadgudub ilmo ama dayacaad laga shakisan yahay.
- Si loo sheego hawl dambi oo laga shakiyey.
- Loogu talogalay cilmi-baarista, hanti-dhawrka ama qiimeynta.
- Sida uu oggolaado amar maxkamadeed.
- Iyadoo la raacayo heshiiska hay'ad adeeg ee u qalma.

Isticmaalada iyo sheegitaannada kale ee macluumaadkaaga xanuunka isticmaalka maandooriyaha ee aan lagu sharxin Ogeysiiskan waxaa lagu sameynayaa kaliya oggolaanshaaga qoran.

Ku xadgudubka sharciga federaalka iyo xeerarka barnaamij waa dambi. Xadgudubyada laga shakiyo waxaa loo sheeki karaa maamulada ku habboon iyada oo la raacayo xeerarka federaalka.

Qaybta 4: Mas'uuliyadaheenna

- Waxaa uu sharciga naga doonayaa in aanu ilaalino asturnaanta iyo ammaanka macluumaadkaaga caafimaadka ee dhawrsan.
- Waxaan kuu sheegi doonaa isla markiiba haddii jebin ay dhacdo ee laga yaabo in ay halis geliso asturnaanta ama ammaanka macluumaadkaaga.
- Waa in aanu raacno waajibaadyada iyo habdhaqanada asturnaanta ee lagu sharxay ogeysiiskan waana in aan ku siino nuqul isaga ah.
- Uma isticmaalayno ama uma wadaagayno macluumaadkaaga wax aan ka ahayn sida lagu sharxay halkan haddii aad noogu sheegto qoraal ahaan in aan u isticmaali karno mooyaane. Haddii aad noo sheegto in aanu awoodno, waxaad ra'yigaaga beddeli kartaa waqti kasta. Qoraal noogu soo sheeg hadduu aad ra'yigaaga beddesho.

Isbeddelada Shuruudaha Ogeysiiskan

Waxaan beddeli karnaa shuruudaha ogeysiiskan, isbeddeladana waxaa loo adeegsanayaa dhammaan macluumaadka ee aynu kaa hayno. Ogeysiiska cusub waxaa la helayaa marka la codsado iyo mareegtadeenna waxaanu kuu soo diraynaa nuqul adiga. Wixii warbixin dheeri ah ka eeg: https://www.kingcounty.gov/depts/community-human-services/mental-health-substance-abuse.aspx.

Qaybta 5: Macluumaadka Dheeraadka ah

Wixii warbixin dheeri ah ka eeg:

- www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/noticepp.html.
- 42 U.S.C. 290dd-3 iyo 42 U.S.C. 290ee-3 ee loogu talogalay Sharciyada federaalka iyo qaybta 2 ee 42 CFR ee loogu talogalay xeer-hoosaadyada Federaalka.

Waaxdada Adeegyada Aadanaha iyo Bulshada ee Degmada King
Qaybta Bogsashada iyo Caafimaadka Dabeecadda
Sarkaalka Asturnaanta (206)-263-9000
401 Fifth Avenue Suite 400, Seattle, WA 98104